PSORIASISFÖRBUNDET

Information om hudsjukdomen psoriasis på somali. Informationen kommer från Psoriasisförbundet.

WARBIXIN KU SAABSAN CUDURKA HARAGGA KU DHACA ”PSORIASIS”

Waa maxay cudurka ”psoriasis”?

Psoriasis waa cudur haragga ku dhaca oo bukaanka ku raago. Dalka Iswiidan wuxuu cudurka ”psoriasis” ku dhaca dad tirodooda gaareeyso 250 000 qof. Astamaha cudurka waxaa ka mid ah calaamado gadgaduudan, ku daboolan qolof oo midabkeeda cad ah. Taaso u sabab ah nudaha hargaha oo ku dhismaan hab aan caadi ahayn. Calaamooyinka ”Psoriasis” waxay ka soo yaacaan haragga, haseyeeshe waxay u badan yihiin suxulka, jilibka, bartamaha oogada iyo maskaxda. Astamaha cudurka ”Psoriasis” waxaa kale ka mid ah finan ka soo yaaaca haragga iyo kilkisha, gumaarka iyo saxaaxda oo soo gaduudato.

Xitaa gacmaha, lugaha, cidiyaha wuu weerara. Aqoonyahaanada waxay aamin san yihiin in cudurka ”psoriasis” u yahay cudur hoos u dhigo waxtarka difaaca jirka. Taaso iyada na dusha ku sidato fasaska haragga iyo badi ahaan kalagoysyada. Cudurka ku dhaca kalagoysyada waxaa la yirahda ”psoriasisartrit”.

Maxaa keena cudurka ”psoriasis”?

Waxaa cudurka keena weli la ma shaacbixin. Haseyeeshe, waxaa mooda in sinjiga (generna) uu kalin weyn ku leeyahay abbuurmodiisa. Waxyaabaha kale oo cudurka keeni karo waxaa ka mid ah¨, cudur-dhaliye iyo walaac/welwel.

Yuu ku dhaca cudurka ”psoriasis”?

Da’ kasto ayuu ku dhici karaa. Haseeyeeshe, wuxuu badi ahaan ku dhaca da’ yarta, kuwaasoo u ku dhaco intii ay san 25 sano buuxsan. Xitaa carruurta wuu ku dhici kara, laakinse caadi ma aha. Tirada dumarka iyo ragga uu cudurka ”Psoriasis” ku dhaco waa isku mid.

Ma lays qaadsiin karaa cudurka ”psoriasis”?

Maja, cudurka ”psoriasis” lays ma qaadsiiyo.

Ma layska daaweeyn karaa cudurka ”psoriasis”?

Maja, cudurka ”psoriasis” ilaa imminka layska ma daaweeyn karo. Laakinse, waxaa hoos loo dhigi karaa dhibaatodiisa. Cilmi-baareyaasha dalka Iswiidan iyo dalal kale ba waxay berri hore ku dhaqaaqeen cilmibaaris lagu baadi-doonaayo waxa cudurka keena. Taasoo ujeedadeeda tahay in la helo hab waxtar leh oo lagu ciribtiro dhibaatada cudurka.

Sidee wax looga qabtaa dhibaatada cudurka ”psoriasis”?

Takhtarrada bukaanada ka daaweeyo cudurka ”Psoriasis” waxay ahmiyad koowaad siiyaan sidii bukaanka u ku heli lahaa noolal caadi ah. Cudurka waxaa lagu daaweeyaa daawo iyadoo goobta la mariyo bomaato, waxaa na lagu iftiimiyaa qalab ”ultraviolett”. Xitaa kiniini waa lagu daaweeyaa. Wax ka qabadka dhibaatada cudurka waa in had iyo jeer u qof takhtar ah hogaamiyaa, siiba qof ah takhtarka haragga.

Psoriasisförbundet Box 5173, 121 18 Johanneshov.
Tel: 08-600 36 36. Fax 08-556 109 19. Pg: 33 66-2. Bg 482-5782. Org nr: 80 20 02-7283. E-post: pso@pso.se
www.psoriasisforbundet.se

Waa maxay ”psoriasisartrit”?

”Psoriasisartrit” waa hurgunta kalagoysyada oo cudurka keena. Qiyaastii boqolkiiba 30% oo bukaanada waxay la kulmaaan dhibaato ka mid ah hurgunta kalagoysyada, seedaha iyo murqaha. Astamahooda oo ah xannuun, adkaasho iyo daal-dareen. Dhibaatooyinka ”psoriasisartrit” waxaa kale ka mid ah faraha cagta iyo kalagoysyada faraha gacanta oo soo barrara. Waxaa kale oo caadi ah hurgunta kalagoysyada laf-dhabarka.

Sidee wax looga qaban karaa dhibaatada ”psoriasisartrit”?

Dhibaatada ”Psoriasisartrit” waxaa lagu daaweeyaa siyaabo kala duwan, kuwaaso ka mid ah: kuwa xannuunka hoos u dhiga, kuwa dhibaatata hurgunta hoos u dhiga iyo kuwa nudaha. Jir-jimicsi iyo tababbarka weelka-biyaha waxay ka mid yihiin iska-daaweeynta. Waxaa bukaanka la siiyaa qalab badbaado darteeda daboolo kalagoysyada iwm. Bukaanada ku dhaco cudurka ”psoriasis” iyo ”psoriasisartrit” waxay u baahan yihiin kaalmada takhtarka maskaxda.

Waa maxay Psoriasisförbundet?

Psoriasisförbundet waa urur dan-wadaage ah oo logu talaggalay bukaanada ”psoriasis/psoriasisartrit” iyo ehelkooda. Ururka PSO wuxuu leeyahay boqolaalo laamo, kuwaaso bukaanka ka heli karo warbixin ku saabsan cudurka iyo sida laysaga daaweeyo. Bukaanku wuxuu heli karaa fursad u ku la kulmo bukaanno kale. Ururku PSO wuxuu u halgamaa in daryeelka cudurka ”psoriasis” dalka Iswiidan kor loo qaado, oona helideeda la fududeeyo. Wuxuu ururka PSO bixiyaa warbixin ku saabsan cudurka, wuxuu na kiciyaa bulshada sida ay ku fahmaan dhibaatada cudurka ”psoriasis” iyo dhibaatada bukaanada ay ku nool yihiin. Ururka PSO wuxuu ahmiyadda koowaad siiyaa cilmibaarista cudurka, wuxuu na kaalmo-dhaqaaleed sannad kasto siiyaa cilmi-baarista. Wargeyska Psoriasis wuxuu sannadkii soo baxa lex jeer. Bogga Internetka ee uruka, www.psoriasisforbundet.se, waxaa laga heli karaa warbixin dheeraad ah oo ku saabsan cudurka. Haseyeeshe, warbixinta waxay ku qoran tahay af-iswiidish.

Waxaa kale la heli karaa bog logula talaggalay da’yarta da’dooda u dhaxeeyso 7-30 sano ”PSO-Ung”, Anaga oo nagu dhacay ”psoriasis”, www.ungmedpsoriasis.se.

Ururka PSO wuxuu rajeynayaa in dadka warbixintaan ku akhristo afkooda hooyo ay xubin ka noqdaan ururuka. Qofka doonaayo innuu xubin ka noqdo wuxuu la xiriiri karaa xafiiska ururka ”förbundskansliet” ama xafiiska gobolka ama degmada ugu dhow aqalkiisa. Adreesyada laamaha ururka waxaa laga heli karaa bogga Internetka oo ururuka PSO www.psoriasisforbundet.se

Adreeska ururka waa:
Psoriasisförbundet
Box 5173
121 18 Johanneshov
Tal 08 – 600 36 36
Faksi 08 – 556 10 919
E-post pso@pso.se
Bogga Internetka www.psoriasisforbundet.se